1. Aduunyadu waa dharaaro
2. Dhawaan laga guuri doono
3. Dhiskeeduna joogi maayo
4. Dhakhsaa loo hoyanayaaye
5. Haday dhimasho iyo geeri
6. Dharaaro kaa sii maqnaato
7. Intaad dhulka sii duljoogto
8. Dhabada khayrkiyo wanaaga
9. Dhugoo dhana ha uga leexan
10. Quraankiyo diinta dheeho
11. Dhigoo Ku dadaal acmaasha
12. Cibaadadu yayn Ku dhaafin
13. Dhawaaqa odoo maqlaayal
14. Dhayal ha uga tagin salaada
15. Ninkii dhalanteed run mooda
16. Xumaanta ka dhawrsan waaya
17. Aduunyada sii dhexqaada
18. Dhubqaaliya hawleheeda
19. Dhabada shaydaanka raaca
20. Ka taga dhaqankii islaamka
21. Macaasi Ku dhiiranaada
22. Markay ajashii dhammaato

23. Markuu aakhiro u dhoofo
24. nuu Ku dhacaayo naarta
25. Inay dhamac leefi doonto
26. Inuu Ku dhex waari doono
27. Quraankaa dhigay warkaase
28. Xadiiska dhahay sidaase
29. Maxaa kaa dhoohay khayrka
30. Maxaad uga dhaga adaygi